Macallinka Woodstock eeAron Steinke sidoo kale waa qoraa abaalmarin mutaysatay

Ardayda ka dhigata Dugsiga Hoose ee Woodstock waxaa la yaabaa in ay isaga u yaqaanaan in uu yahay Mr. Steinke, wax u dhiga fasallada afaraaad iyo shanaad. Laakiin meelaha kale, Aron Nels Steinke waxaa si fiican loogu yaqaanaa wax kale: in uu yahay qoraaga abaalmarin mutaysatay ee buugaagta sawirrada farshaxanka leh ee loogu talagalay carruurta.

Isaga oo isla hadaba ku guuleystay Abaalmarinta Eisner – oo inta badan loo yaqaan Oscar-ka buugaagta qosolka ah – Steinke wuxuu kor u qaadayaa dadaaladiisa cusub, “Mr. Wolf’s Class,” oo ah buug sawirrada farshaxanka leh oo soo baxay Juun. Maalinta Sabtida, wuxuu aadi doonaa mid ka mid ah meelaha astaamaha u ah qoraaga Portland, iyada oo 2 galabnimo wax akhris iyo wax saxiixid uu ka dhici doono Powell’s City of Books.

“Mr. Wolf’s Class,” oo soo baxay Juun, waa buugii u horeeyay ee buugaag taxane ah oo saddex ah oo uu qorayo oo loogu talagalay Scholastic Graphix. Wuxuu sheegayaaa sheekada macallin ay ardaydiisu yihiin xayawaano kala duwan leh, laakiin hab-dhaqankoodu yahay sida aadanaha. Steinke wuxuu sheegay in buugu yahay mid kaliya nolosha ka hadlaya, oo leh sheekooyin uu ka bartay waayo-aragnimadiisa macallin ahaan.

“Qofka wax jilaya ee Mr. Wolf waa aniga oo kale, laakiin runtii aniga ma ah,” ayuu yiri Steinke, oo sanadkii saddexaad jooga Woodstock, iyo shan sanadood oo uu ka tirsan yahay Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Steinke wuxuu sheegay in uu naftiisa u arko in uu yahay qoraa iyo sawir yaqaan, laakiin qaybta wax sawirrudu ayaa timid marka hore, wuxuuna bartay sida loo qoro sheekooyinka loogu tagalay sawirradiisa. Wuxuu markii hore sawiray qofka wax jilaya ee Mr. Wolf oo loogu talagalay dhageystayaasha waaweyn, laakiin wuxuu sawirridiisii u qaaday fasalka iyada oo uu qoraal tirtiray wuxuuna ardayda faray in ay qoraan wixii dhacayay.

“Waxaad runtii ardayda tusi karaa nidaamka wax qorista,” ayuu sheegay. “Waa sidii hab wax la soo bandhigayo oo kale kaasi oo lagu ogaanayo fikraddo.”

Bishii la soo dhaafay, buuga waxaa loo xushay Liiska buugaagta ee York Times kuwaasi oo "yareeya cabsida laga qabo ku noqoshada dugsiga,” kaasi oo lagu doortay qoraal uu qoray tafaftiraha buugaagta carruurta ee Maria Russo: "Dhibaatooyinkooda iyo dabeecadoodu waa mid aad u soo jiidasho leh sida kuwa dhiggooda ah ee dugsiyada ee loogu talagalay carruurta aadanaha ah — kaliya ka sii qosol badan."

Buuga labaad ee taxanaha ah, “Mystery Club (Mr. Wolf’s Class #2)” wuxuu soo bixi doonaa Febraayo.

Steinke, oo ku koray degaanka Camas/Vancouver, wuxuu soo dhigtay dugsiga filimada oo ku yaala Vancouver, British Columbia. Isaga oo ka fikiraayay waxa uu ku samaynayo noloshiisa, ayay xaaskiisa u sheegtay in uu ku fiican yahay carruurta oo ay tahay tixgelinta siiyo wax barista. Wuxuu dhammeystay shahaadooyin uu ka qaatay Portland State & Lewis & Clark wuxuuna bilaabay xirfad waxbarasho.

Laakiin waxa uu sii waday wax sawirrida iyo wax qorista, labada dhinacba way isku yimaadeen. Inkasta oo ardaydiisa iyo fasaladiisa ay dhiirrigeliyeen waxyaabaha ay ka kooban yihiin buugaagtiisu, xirfadiisa wax qoristu waxay sidoo kale gacan ka geysteen wax baristiisa.

“Waxaan la shaqeeyaa tafaftirayaasha, iyo ardaydayda, marka ay dadka la wadaagayaan sheekooyin ay qoraan, waxay wax ka bartaan wada shaqeynta, sida aad u rabto in aad waxa aad qorto dadka kale ula wadaagto,” ayuu sheegay.